

**FAAFINTA RASMIGA AH: Sanadka 4aad, Cadadka 4aad ee soo baxay 02/05/2015  
SIXID (CORRIGENDUM)**

**SIXID: Wax-ka-bedelka iyo Kaabista Xeerka Diiwaangelinta Codbixiyaaha  
Xeer Lr. 37/2007**

Nuqulkii Xeerka **Wax-ka-bedelka iyo Kaabista Xeerka Diiwwangelinta Codbixiyaaha Xeer Lr. 37/2007** ee ku soo baxay Faafinta Rasmiga, Sanadka 3aad, Cadadka 12aad ee 03/01/2015 waxaa la saxay qodobadan iyo erayadan hoos ku qoran:

**Qodobka 2aad-  
Eraybixinta**

**“Diiwaanka:** - wuxuu u qorna sidan “waxa loola jeedaa diiwaanka lagu qoro magacyada codbixiyaasha ee goob doorasho kasta”.

**Sixiddu** waxa weeye sidan: “Waxa loola jeedaa diiwaanka lagu qoro xogta muwaadiniinta warqada aqoonsiga iyo codbixiyaasha ee goob doorasho kasta.”

**“Diiwaanka Guud:** - wuxuu u qornaa sidan “waxa loola jeedaa diiwaanka dhexe ee la dhigo xarunta komishanka doorashooyinka kasoo lagu kaydiyo dhamaan magacyada codbixiyayaasha Qaranka Somaliland”.

**Sixiddu** waxa weeye sidan: “Waxa loola jeedaa diiwaanadda dhexe ee la dhigo xarunta Wasaarada Arrimaha Gudaha iyo Komishanka Doorashooyinka, kuwaas oo lagu kaydiyo dhammaanba xogta Muwaadiniinta iyo Codbixiyayaasha”

**Qodobka 7aad:**

Cinwaanka Qodobkan **7aad** waxa uu u qorna sidan “kaydinta Diiwaaangelinta”.

**Sixidda** Cinwaankuna waxa weeye sidan:  
“Kaydinta Diiwaangelinta iyo soo saarista Liisaska kama dambaysta ah”

**Qodobka 25aad:**

**Diiwaan-galinta Codbixiyayaasha**

Qodobka **25aad**, Faqraddiisa **2aad** waxay u qorneyd sidan: “Hadii ay dhacdo in Muwaadiniinta qaarkood ay suurto-galin waydo in ay hore usii qaataan Wasaarada aqoonsiga Muwaadinka, waa in Wasaarada Arrimaha Guduhu ku sugtaa Muwaadinnimadooda goobta qaadaashada kaadhka codbixiyaha”

**Sixiddu** waxa weeye sidan “Hadii ay dhacdo in muwaadiniinta qaarkood ay suurto-galin waydo in ay hore u sii qaataan Warqadda aqoonsiga Muwaadinka, waa in Wasaarada Arrimaha Guduhu ku sugtaa Muwaadinnimadooda goobta qaadashada kaadhka codbixiyaha”

**Qodobka 26aad:**

**Habka Diiwaangelinta Codbixiyayaasha**

Qodobka 26aad, Faqraddiisa 2aad waxay u qorneyd sidan: “Liiska diiwaanka codbixiyaha waxa soo saaraya Komishanka Doorashooyinka Qaranka laba bilood ka hor xilliga Doorashada”

**Sixiddu** waxa weeye sidan “Liiska diiwaanka codbixiyayaasha waxa soo saaraya Komishanka Doorashooyinka Qaranka Lixbilood (6) ka hor xilliga doorshada.

**Qodobka 28aad:**

**Ku Dhawaaqidda Diiwaangelinta Codbixiyayaasha**

Qodobka 28aad wuxuu u qornaa sidan: “Komishanka Qaranka ayaa ku dhawaaqaya xilliga la bilaabay Diiwaangelinta Codbixiyayaasha marka ay tashadaan Axsaabta Qaranka, waxayna ku wargelindoonaan Madaxweynaha JSL”.

**Sixiddu** waxa weeye sidan “Madaxweynaha ayaa ku dhawaaqaya xilliga la bilaabay diwaan-gelinta Codbixiyayaasha, isaga oo ku soo saaraya Xeer Madaxweyne, ka dib marka uu helo soo-jeedinta Komishanka Doorashooyinka Qaranka mudo shan iyo tobban maalmood gudahood oo ka bilaabanta marka uu helo soo-jeedinta”.

**Qodobka 42aad:**

**Goob-Joogayaasha**

Qodobka 42aad, wuxuu u qornaa sidan “Goobjoogayaasha ama Kormeerayaasha Caalamiga iyo kuwa maxaliga ah ee hubinaya habsami u socodka hawlaha diiwaangelinta Codbixiyayaasha, waxa ogolaanaya Komishanka Doorashooyinka Qaranka isagoo xaga amaanka kala kaashanaaya Wasaarada Arrimaha Gudaha”.

**Sixiddu** waxa weeye sidan “Goob-joogayaasha ama Kormeerayaasha Caalamiga iyo Kuwa maxaliga ah ee hubinaya habsami u socodka hawlaha diwaan-gelinta codbixiyayaasha, waxaa wasaaradda Arrimaha Gudaha u soo gudbinaya Komishanka Doorashooyinka Qaranka, si ay go’aan uga gaadho ogolaansha dal ku galka”.

**Qodobka 44aad:**

**Ciqaabta Xadgudubka**

Qodobka 44aad, Faqraddiisa 3aad waxay u qorneyd sidan: “Qof kasta oo aan ahayn muwaadin Somalilander ah oo isku daya inuu is diiwaan geliyo wuxuu mutaysanayaa ciqaab dhan 5 bilood oo xadhig ah, 2 milyan oo ganaax lacageed ah iyo dalka oo laga mustaafiyo marka uu dhameysto mudada xadhiga ah”.

**Sixiddu** waxa weeye sidan “Qof kasta oo aan ahayn muwaadin Somalilander ah oo isku daya inuu is diiwaan geliyo wuxuu mutaysanayaa ciqaab dhan 5 bilood oo xadhig ah oo aan iib lahayn, 2milyan oo ganaax lacageed ah iyo dalka oo laga mustaafiyo marka uu dhameysto mudada xadhiga ah”.